Reimagining Education During the Pandemic

PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

# Sanduuqyada Cuntada Waxa Loo Qaybin Doonaa Qoysaska Kahor Fasaxa Jiilaalka

**16 ka Diisambar, 2020**

Qoysaska PPS ee Sharafta Leh,

Maadaama oo aanu u diyaargaroobayno bilawga fasaxa jiilaalka ee labada toddobaad ah, waxa aanu doonaynaa inaanu kugu baraarujinno adeeg dheeraad ah oo aanu bixin doono maalinta u dambaysa qaybinta cuntada kahor fasaxa. Jimcaha, 18 ka Diisambar, waxa aanu bixin doonaa sanduuqyo cunto ah oo toddoba cisho ku filan. Qoysaska is diiwaangeliyey gaadhsiinta cuntada sidoo kale waxa ay heli doonaan sanduuqyada cuntada. Inta ugu badan alaabaha ku jira sanduuqa cuntadu way ku bad qabi doonaan in lagu kaydiyo heerkulka qolka (eeg hagaha keydka cuntada).

Tani waxa ay dhici doontaa inta lagu gudo jiro daaqadayada qaybinta cuntada ee caadiga ah, laga bilaabo 3 ilaa 4:30 g.d., waxa ay ka dhici doontaa 35 ka goob-dugsiyeed ee aanu u adeegsanno adeega cuntada inta aanu ku jirno waxbarashada masaafadda ah (eeg goobaha iyo khariidadda). Waxa aanu kaa dalbanaynaa inaad ku dhaqanto kala fogaanta bulsheed oo aad xidhato weji gashad.

Adeegayaga cuntadu waa uu istaagi doonaa inta dugsiyadu ay xidhan yihiin inta lagu gudo jiro fasaxa jiilaalka, laga bilaabo 21 ka Diisambar illaa 1 da Jeenawari. Adeegga cuntadu waxa uu dib u bilaabmi doonaa Isniinta, 4 ta Jeenawari.

Haddii aad uga baahan tahay kaalmo dheeraad ah helitaanka cuntooyinka inta dugsigu xidhan yahay, fadlan booqo www.pps.net/nutrition oo riix calaamadaha "Khayraadka Helitaanka Goobta Cuntada" iyo "Faa'iidooyinka Cuntada ee Qoysaska". Waxa aad sidoo kale kala xidhiidhaa xafiiska dugsigaaga wixii ku saabsan taageerooyinka iyo khayraadka kale ee la heli karo.

Waxa aanu dhammaantiin idiin rajaynaynaa xilli fasax ooo nabdoon, oo farxad leh.

Adeegyada Nafaqada PPS